# Shaqada Garsooraha ee Dacwadaha Ciqaabta iyo Madaniga

W/Q: Muuse Axmed Ciise (Muuse Qaanuun)

## Qaybta 1aad: Shaqada Garsooraha ee Dacwada Ciqaabta

### 1.1Shaqada Garsooraha Dacwada Ciqaabta ka hor

1.Hubinta Ikhtisaaska Maxkamadda ee Dacwadda ciqaabta Qod 2,4,5,6,7,8 XHC
2.Hubinta Dhicida denbiga iyo Noocyada Ogaysiintiisa ,waana waxa loo yaqaano Warqada Taarka 17,18,19,20,21 XHC
3.Hubinta Dhinacyada Dacwadda ciqaabta (eedeysanaha Qod.13 XHC,Dhibanaha Qod.14 XHC,Xeer-ilaalinta Qod.12 XHC iyo Qareenka Dacwadaha qaar Qod.15 XHC)
4.Soo saarista Amar u yeeritaan Maxkamadeed 48,49 XHC
5.Soo saarista Amar soo qabasho Maxkamadeed 40,41,42,43 XHC
6.Soo saarista Amarada Fatashaada (baaritaanka) ama Xayiraada 52,53,54 XHC
7.Hubinta Horgaynta Maxkamadda qofka la soo qabtay mudo 48 saac gudahood ah 39 XHC
8.Qiimaynta warbixinta kooban ee ka hadlaysa dhacdada faldembiyeedka iyo sidii qofka loo soo qabtay 39,45 XHC
9.Hubinta qofka lagu soo qabtay amar maxkamadeed la'aantiis in loo maray wadooyinkii sharcigu tilmaamayey 39 XHC
10.ka qorida eedeysanaha qiraal ,isaga oo saxiixaya qiraalkaas una akhrinaya eedeysanaha,raacayana Habraaca qiraalka ee ku xusan Qod.68 iyo 149 XHC
11.Aqbalida Codsiga Xeer-ilaalinta ee baarista dheeriga ah si waafaqsan Qod.47XHC
12.Soo saarista Amar Xabsi ku haynta ku meelgaarka ah 46 XHC
13.bixinta Damaanada denbiyada qaar 59
14.ka qaadida Sarkaalka Booliska ah talaabooyinka anshaxmarinta ee ku xusan Qod.32 XHC hadii denbi galo

15.Mudaynta Dacwadda ,gaadhsiinta Dhinacyada (eedeysanaha,dhibanaha,Xeer-ilaalinta iyo Qareenka ) iyo markhaatiyada iwm Qod.75 XHC
16.Magacaabida Qareen Dacwooyinka ay khasabka tahay in loo magacaabo haday samaysan waayaan sida Dilka,Xabsi daainka iyo dacwadaha ay ciqaabtoodu ka sarayso ugu yaraan 10 sano Qod.75,15,16 XHC

## 1.2 Shaqada Garsooraha D.ciqaabta dhexdeeda

1.Maamulida iyo Hagida Fadhiga dhegeysiga Dacwadda iyo Soo saarista Amaro fadhiga dhexdiisa Qod.99 XHC
2.ka dhigida fadhiga Dacwadda mid daahfuran Qod.96 XHC
3.Ka dhigida fadhiga Dacwadda mid qarsoodi ah hadii la helo Asbaabaha ku xusan Qod.96 XHC iyo 107 Dastuurka KMG JFS
4.ilaalinta Xuquuqda Eedeysanaha Qod.35 Dastuurka KMG JFS
5.ilaalinta xaqa Dacwadda iyo Isdifaaca Qod.34 Dastuurka KMG JFS
6. Soomaaliyaynta Maxkamadda sida in lagu furfurto Duco iyo Quraan
7.ku baraarujinta dhinacyada inay ilaaliyaan Habsami u socodka Dacwadda Sida Shuruudaha Dadwaynaha ka soo qaybgalaya Dhegeysiga Garmaqalada Qod.97 XHC ,Waajibaadka dadka ka soo qaybgalaya dhegeysiga Dacwadda Qod.98 XHC.
8.in eedeysanaha Maxbuuska ah uu ka ilaaliyo in la xanibo (katiinada waa in laga furaa)hadii aanay tallaabooyinka lagu xadidayaa aanay laga maarmaan u ahayn ka hortag fakasho ama xadgudub Qod.100 XHC
9. Furitaanta Maxkamadda iyo u jeedinta Eeda lidka ku ah eedeysanaha ka dib markuu hubsado inuu joogo eedeysanuhu iyo Dacwad ooguhuba(Xeer-ilaaliyaha) iyo in uu u magacaabay Qareen xaaladaha ay kasabka tagay hadii aanu lahayn eedeysanahu Qareen Qod.103/1 XHC iyo 14 XNG
10.in marka eeda u akhriyo eedeysanaha waa in uu ugu sharxaa hab la

fahmi karo oo cad waxyaabaha eed dembi kasta oo ka mid ah eediisa Qod.103/2/A
11.waa in uu ku wargeliyaa eedeysanaha marka eeda loo jeediyo inuu saddex jawaabood ka bixin karo eeda Denbi kasta oo kala ah sidatan
-in uu ku jawaabo inuu Ishortaag ( dood sharci) oo waafaqsan qod.105 XHC uu ka qabo
-in uu ku jawaabo in uu dembiile yahay
-in uu ku jawaabo in aanu dembiile ahay (eeg Qod.104 XHC)
12.in hadii eedeysanayaashu badan yihiin uu ilaaliyo eed akhrinta iyo ujeedinta u gaarka ah eedeysane kasta si aanu u waayin xaqa Isdifaacida mid kasti sida inuu isticmaalo Eedeysanaha 1aad ,2aad,3aad (eeg Qod.103 /3 XHC)
13. in uu Qaraar Maxkamadeed(mid af ah ama Qoraal) uu ka soo saaro Is hortaagyada ( Dood sharciyeedka) eedeysanaha Qod.106 XHC qaraaradaas oo ah sidatan :
-ku dhawaaqida go'aan ah in aan dacwad lagu qaadi karin eedeysanaha isagoo sababaynaya
-Soo saarista go'aanada siideynta haduu xabsi ku meelgaara ku jiray, Amridda Tirtirida Talaabooyinka Taxadarnimimo ku meel gaara ee xagga Amniga ah hadii ay saarnaayeen eedeysanaha,hadii eedeysanuhu uu haysto Xoriyad ku meel gaara (damaanad) waa inuu amraa baabi'inta (tirtirida) xaaladaha lagu waajibiyay ee Damaanada lagu bixiyay, inuu ka madaxbaneeyo kuwii wax damiintay waajibaadkii ay qaadeen loona celiyo lacagihii ay dhigeen Maxkamadda,hadii eedeysanaha lagu sii daayay sabab la xidhiidha mudo dhaaf xilligii xabsiga ku meel gaarka ah wuxuu amrayaa tirtirida xaaladaha lagu waajibiyay
-inuu amro ku dhaqanka talaabooyinka Nabadgelyo Xaaladaha ku xusan Xeerka Ciqaabta.
-inuu amro in Dacwadda loo gudbiyo Maxkamadda Awooda leh,hadii aanay Maxkamaddiisu awood u lahayn ama dacwadu ka furantahay

Maxkamad kale
-hadii uu u arko in qaadista dacwaddu ay tahay Awooda Maxkamadiisa wuxuu qadimayaa khilaaf awoodeed.
-hadii xubin ka mid ah Guddiga Garsoorka aanu u qalmin inuu ka qaybgalo si waafaqsan Qod.10 XHC wuxuu Gudoomiyaha Gudoomiyaha Dacwaddu ama Gudoomiyaha Maxkamaddu la socodsiinayaa Maxkamadda ka saraysa si ay go'aan uga soo gaarto.
-hadii eedu aanay waafaqsanayn qaabkii iyo Tusmayntii XHC,wuxuu amrayaa Xeer-ilaaliyaha inuu Dacwadda wax ka soo bedelo si waafaqsan Xeerka isaga oo siinaya Mudo gaaban haday suurto gal tahay.
-qaraarkasta oo suurtagal ah wuu ka soo saari karaa garsooruhu ishortaagayada (Objections) [eeg Qod.105,106XHC]
-hadii uu geeriyoodo eedeysanuhu Garsooruhu wuxuu soo saarayaa qaraar Maxkamadeed oo ku saabsan in aan dacwad lagu qaadi karin eedeysanaha [eeg Qod.107]
14. Garsooruhu wuxuu ku dhawaaqayaa Xukunka islamarkiiba hadii uu qirto eedeysanuhu denbi ciqaabtiisa ugu badani tahay 10 sano ama ciqaab ka yar (qod.108/1/A)
15.Garsooruhu wuxuu maraya Habraacyada ku xusan XHC wuxuu amrayaa dhegeysanayaa Dacwadda Ciqaabta ilaa ay ka soo gabagabowdo hadii aanu qiraalku xaqiiqada waafaqsanayn iyo hadii denbiga ciqaabta ugu badani tahay Xadhig aan ka yarayn 10 sano ama in ka badan ama ciqaab ka sii adag .(Qod.108/1/A iyo B)
15.Garsooruhu marku qiraalka qaadayo waa inuu raacaa Habraaca ku xusan Qod.68 XHC,waa inuu ogaadaa inuu ka noqon karo eedeysanuhu qiraalka Dembiga Xilli kasta oo ay marayso Garmaqalada Maxkamaddu marxaladda 1aad ka hor intaanu xukunku soo bixin Qod.108/2 XHC
15.Garsooruhu wuxuu ka ogolaanayaa Xeer-ilaaliyaha Wax ka bedelida eeda Qod.111 XHC

16.Garsooruhu wuxuu ka ogolanayaa Xeer-ilaaliyaha ka noqoshada Eedda qayteed ama kuligeed waqti kasta ka hor inta aan lagu dhawaaqin Xukunka lagu dhawaaqin Qod.112 XHC,wuxuuna soo saarayaa Xaaladaas qaraar aan Dacwad lagu qaadi karin eedeysanaha .
17.Garsooruhu wuxuu dooda hor siinayaa Xeer-ilaaliyaha hadii aanu eedeysanuhu qiran denbi ciqaabtiisa ugu badani tahay 10 sano ama ciqaab ka yar ,si uu u soo bandhigo in Denbi dhacay iyo in eedeysanuhu yahay kii denbiga galay wuxuu bilaabayaa soo bandhigida Cadaymaha isaga oo si kooban u sheegaya(Weedha Furfurashada)
-Nooca iyo habka eedda dambiga la isku hayo
-Noocyada caddaymaha uu damacsanyahay inuu ku muujiyo in eedeysanuhu ka masuul yahay dembigaas, intaas ka dib Maxkamaddu waxay dhegeysanaysaa Cadaymaha Xeer-ilaaliyahu soo bandhay Qod.114 XHC
18. Garsooruhu wuxuu Soo saarayaa kuna dhawaaqayaa in aan Dacwadda la sii wadi karin Caddayn la'aan Qod.115 XHC ka dib markay suaasho Xeer-ilaaliyaha inuu Eedda la noqonayo .
19.Garsooruhu wuxuu siinayaa eedeysanaha ka dib markuu eedeysanuhu soo bandhigo eediisa iyo cadaymihiisa
- si uu isu difaaco una soo bandhigo cadaymo uu isku difaacayo
-soo jeediyo Cadday isaga oo dhaartay markan wuxuu qaadanayaa Axkaamta maraga
-Soo jeediyo Caddayn isaga oo aan dhaaran si uu uga jawaabo Eedda
20.in Garsooruhu Cadaymaha u maro Habraaca ku xusan XHC (135-207 XHC)
20. Garsooruhu wuxuu u ogolaanayaa dhinacyada soo bandhigida Caddaynta beenaynta Qod.117 XHC
21.garsooruhu wuxuu amrayaa isaga oo cidina ka codsan keenida Caddaymo ay Maxkamaddu u aragtay laga maarmaan ama ku haboon si loo xaqiijiyo runimadeeda Qod.118 XHC

22.Garsooruhu wuxuu u diidayaa Suaalaha Hagida dhinaca keensaday maraga
23.Garsooruhu wuxuu hubinayaa Shuruudaha Maraga looga baahanyahay
15.Garsooruhu wuxuu u diidayaa xaqa hadalka dhinaca hadii xadgudub sameeyo hadii uu soo dhexgeliyo meesha hadal aan looga baahnayn meesha ama mowduuca ka baxo ama dariiq kasta oo kale ka dib markuu siiyo 2 digniinood Qod.119 XHC
15.Garsooruhu wuxuu siinayaa Doorka Dhibanaha iyo Qareenkiisaba intaanu dacwadda soo gabagabeyn Xeer-ilaaliyuhu Qod.14/3 XHC
25.Garsooruhu wuxuu amrayaa in Dacwadda la soo gabagabeeyo dhegeysigeeda waxaana hor hadlaya Xeer-ilaaliyaha ka dibna eedeysanaha ayaa u danbaynaya Qod.119 XHC
26.Garsooruhu wuxuu dib u dhigi karaa Dacwadda si waaqsan Qod.101 XHC.

**1.3 Shaqada Garsooraha D.Ciqaabta ka dib**

1.Diraasaynta Galka gabagabeynta Dacwadda ka dib
2.Hubinta iyo Akhrinta Qoraalka Fadhiyada (Maxdarada ama Garmaqalada) Qod.94,132,133 XHC.
3.ku gaadhida Go'aanada Qolka Showrka hadii Dacwaddu Guddi tahay ,waana In uu Sir noqdaa Goaanku ,sidoo kale waa in Aqlabiyada Codadku sir noqotaa ,mana banaana inuu Garsooruhu diido codaynta waxaana bilaabaya Garsooraha ugu darajo yar ama ugu danbeeyey dhanka shaqada ,lagumana sheegayo Go'aanka sida loo kala codeeyey [eeg Qod.86XHC]
4.Qoritaanta Go'aanada Maxkamadda iyo ilaalinta qaab qoraalkeeda si aan loo burin si waafaqsan Qod.84 XHC gaar ahaan Xukunada,Qaraarada Dacwadda dhamaynaya ama Qaraarada la duri karo iyo Qaraarada la xidhiidha Xoriyadda Shakhsiga iyo Amarada.
5.Soo Saarista Go'aan( Xukun,Qaraar,) waafaqsan Qaab Qoraalka ku

xusan Qod.121 XHC.
6.Sababaynta Xukunka 84,121 XHC
7.Beriyeelida Eedeysanaha iyo ku Dhawaaqida Go'aankiisa Beriyeelida Qod.122 XHC
8.Soo saarista Qaraarada ka dhalanaya Siidaynta ee ku xusan Qod.76 XHC
9.Dembi ku helida eedeysanaha iyo Xukumida inuu dembiile yahay 123 XHC
10.ku dhawaaqida Go'aanka si degdeg ah ama sidii hadba suurta gal ah ka dib markay maxkamadayntu dhamaato Qod.120 XHC
11. Akhrinta Go'aanka lagu dhawaaqayo ee Gudoomiyaha Guddiga Dacwadda ama Xubin ka mid ah, iyadoo uu ku akhrinayo meel furan oo ay joogaan eedeysanaha iyo Xeer-ilaaliyaha, hadii Go'aanku ku saabsanyahay berinimo ama ciqaab maaliyadeed waxaa ku filan joogitaanka Qareenka eedeysanaha ,akhrinta iyo ku dhawaaqida xukunkuna waxay la mid tahay iyadoo la gaarsiiyay Dhinacyada Jooga ama dadka cid metelaya Qod.120 XHC
12. Kadib Akhrinta Go'aanka ku helidda denbiga xiliga ku dhawaaqida waa inuu Garsooruhu weydiiyaa Xeer-ilaalinta in hore loo xukumay denbiilaha,waana inuu XR cadayn u keenaa Xukunadii iyo qaraaradii hore loogu xukumay denbiilaha ,intaa ka dib waxaa lagu ridayaa Ciqaabta hadii aanu Garsooruhu cafiyin sidoo kale wuxuu ku dabaqayaa Talaabooyinka Amni ee ku xusan XC,wuxuu kaloo u fasaxayaa inuu ku badalan karo Xabsiga ciqaab maaliyadeed iyo ka joojinta Ciqaabta ee Shardigu ku xidhanyahay ,wuxuu kaloo soo saari karaa Qaraar kasta oo ka dhalan kara sida in Caadayste uu xukumo si waafaqsan Qod.61 XC.
13.marka uu Garsooruhu ku dhawaaqo Go'aanka isagoo raacaya habraaca ku xusan Qod.120 XHC wuxuu u sheegayaa Eedeysanaha inuu leeyahay xaqa duritaanka Go'aanka Qod.123 XHC.
14.Garsooruhu wuxuu bedeli karaa qodobkii lagu soo eedeeyay

Eedeysanaha ee ku xusnaa Eeda isagoo ilaalinaya ikhtisaaska Maxkamadda ama si guud wuxuu awood u leeyahay inuu goaan ka gaaro Xidhiidhka ka dhexeeya Go'aanka iyo eeda lagu soo eedeeyey eedeysanaha Qod.124 XHC

15.Garsooruhu wuxuu ku bedeli karaa Xabsiga Ciqaab maaliyadeed (Lacag) hadii aanu xabsigu ka badnayn 1 sano isaga oo raacaya habraaca ku xusan Qod.125 XHC

16.Garsooruhu wuxuu bixin karaa Cafis Garsoor hadii denbiiluhu ka yaryahay 18 sano ama uu ka wayn yahay 70 sano denbiga uu galayna uu aanu ka badnayn 3 sano iyadoo la raacayo Habraaca ku xusan Qod.126 XHC

15.Garsooruhu wuxuu joojin karaa Ciqaabta iyadoo shuruud ku xirantahay hadii ciqaabtu aanay ka badnayn 3 sano ama ciqaab maaliyadeed oo qudha ama ciqaab xabsi oo la bedeshay iyadoo la raacayo habraaca ku xusan Qod.127 XHC

16.Garsooruhu wuxuu awood u leeyahay Cafiska Garsoor inuu bixiyo iyo ka joojinta Ciqaabta Shardiyaysan, inuu sameeyo shaqo joogto aha ,inuu qofka denbiiluhu isdaweeyo hadii ay ahaan lahayd daawayn gaara ama mid nafsi ah ,inuu u diido ku soo noqnoqashada meelo cayiman ama raacida dad cayiman ,in aanu hub qaadan iyo nooc kale ee uu garsooruhu u arko Qod.128 XHC .

17.Garsooruhu wuxuu leeyahay Awoodda ilaalinta Khatarta Dembiga iyo Qiidaynta Ciqaabta isagoo maraya habraaca ku xusan Qod.110 XC

18.Garsooruhu waa inuu xisaabta ku darsadaa markuu Ciqaab ridayo duruufaha fududeeya Ciqaabta ee ku xusan Qod.40 XC

18.Garsooruhu sidoo kale waa inuu xisaabta ku darsadaa markuu ciqaab ridayo mararka qaar duruufaha adkeeya Ciqaabta si waafaqsan Qod.39 XC laakiin hadii qodobka laftigiisu leeyahay duruufaha Ciqaabta adkeeyaa waxaa fiican inuu isaga iskaga kaaftoomo

19.Garsooruhu sidoo kale marmar qaar waa in uu ciqaabta ku daraa

talaabooyinka Amni ee  axkaamtiisu ku xusan tahay  Qod.161-181 sida in eedeysanaha lagu xiro laguna  daweeyo isbitaalka dhimirka ama goobaha dhaqancelinta caruurta,kor kala socoshada Booliska dadka mukhaadaarka isticmaala,in dalka laga musaafuriyo ajnabiga denbiga galay ,wuxuu kaloo ku dari karaa Talaabooyinka Amniga maaliyadeed sida la wareegida hantida iyo habraaceeda ku xusan Qod.182-183 XC

20.Xukumida danaha madaniga ah ee la socda ciqaabta ka dib marka laga doodo Codsiga dhibanaha ee danaha madaniga ka dib marka dembi lagu helo eedeysanaha iyada oo la raacayo Habraaca ku xusan Qod.14,130,131 XHC iyada oo la raacayo Axkaamta Qaanuunka madaniga.

21. Hubinta Diyaarinta Tirakoobka Galka

## 1.4 Ogaysiinta Xidhitaanka(Taarka)

Garsooraha waxaa laga rabaa isaga oo fulinaya Qod.33 XHC iyo si guud Qodobada ka hadlaya Qabashada eedeysanaha iyo xuquuqdiisu in uu hubiyo waxyaabaha ay muhiimka tahay in laga helo warqada ogaysiinta Xiritaanka (warqada Taarka) waana sidatan soo socota:

1.Magaca Eedeysanaha ama wax lagu aqoonsan karo

2.Sharaxaada Dhacdada oo kooban

3. Xiliga dhacdadu dhacday ama falku sida saacada,maalin ama habeen

4.Goobta dhacdadu  ama falku ka dhacday/dhacay

5.Magaca Dhibanuhu haduu jiro

6.Cadaymaha hordhaca ah

7.ogaysiinta Maxkamadda qof kasta oo lagu soo xiro  Saldhiga Booliska

8.Ogaysiinta Xafiiska Xeer- ilaaliyaha Guud qof kasta oo ku xiran Saldhiga Booliska

9.Cadaynta Sababta Soo qabashada eedeysanaha sida in denbi dhacay

,eedeysanuhuna yahay kii galay denbigaas

10.Cadaynta sababta sii daynta sida in eedeysanuhu noqon waayay qofkii galay fal denbiyeedka

11.Saxiixa Taliyaha Saldhiga ama madaxa baarista denbiyada.

## Qaybta 2aad : Shaqada Garsooraha ee Dacwada Madaniga

### 2.1 Shaqada Garsooraha Dacwada Madaniga ka hor

1.Hubinta Arjiga Dacwadda
2.Hubinta Wakaaladda Dacwadda hadii ay jirto
3.Mudaynta Dacwadda
4.Hubinta Dhamaystirka qoraalada dhinacyada
5.Hubinta Gaarsiinta Waraaqaha Maxkamadda Dhinacyada sida Mudaynta, Arjiga Dacwadda iyo Jawaabcelintiisa
6.Hubinta Qabashada Cashuurta iyo ka go'aangaarida Cashuur dhaafka
7.Magacaabidda Qayimka ,Wasiga, Naadirka iyo Hubintiisa
8.Magacaabida Qareenka hadii uu garsooruhu u arko
9.Magacaabida Turjumaanka
10.Hubinta Dukumentiyada Dhinacyadu inay Galka ku jiraan sida Milkiyadda,Hibada,Dhaxalkoobka,warqadda Guurka,Warqadda Furiinka,Warqadda Dardaaranka Hishiisyada oo dhan si Guud Iwm.
11.ka go'aan gaaridda Soo dhexgelidda dhinacyadda
12.Hubinta Ikhtisaaska Dacwadda
13.Aqbalaada Dib u dhigista Mudaynta Dacwadda
14.Hubinta inuu Dacwadda Galo inuu Awood u leeyahay
15.Hubinta Galka inuu Diiwaangashanyahay iyo Xiliga lagu soo qoray

### 2.2 Shaqada Garsooraha Dacwada Madaniga dhexdeeda

1.Hubinta Joogitaanka Dhinacyada iyo Saxnimadooda
2.Hubinta Qoritaanka Maxdarka
3.Saxiixida Maxdarka ee Garsooraha iyo kaaliyaha
4.Maamulidda Fadhiga Dacwadda sida fadhiisinta Dacwoodaha dhanka midig kan kalena dhanka bidix.
5.Soomaaliyaynta Maxkamadda sida ku bilaabida quraan,Ducada

furfurashada,is  sheegida dhinacyada ka soo qaybgalay dacwadda,in Hoolka laga helo Astaanta qaranka iyo calanka
6.Waydiinta Dhinacyada inay Sulux gelayaan iyo in kale
7.iska horkeenida dhinacyada
8. U ogolaanshaha dhinacyada in la  siiyo  Koobiga Maxdarka Dacwadda
9.Aqbalida Dib u dhigista Dacwada haday jirto asbaab macquula ama diidideeda,taasoo lagu diiwaangelinayo Maxdarka Dacwadda Sababta ogolaanshaha ama diidmada
10. Hubinta Daahfurnaanta Fadhiga Maxkamadda iyo ka goaangaarista in Qarsoodi lagu dhegaysan karo hadii asbaabteedii la helo
11.qorida Amarada aan dacwada dhamaynayn sida Xayiraada,diidida safarka dhinacyada iwm.
13.ka go'aan gaarista qaabka qaadista dacwadda sida dacwad maqane ama mid dadkeedu joogaan
14.ka go'aan gaaridda Joojinta,kala go'idda iyo dhicidda Dacwadda markii la helo mid kasta sababteeda.
15.qiimaynta Dacwaddu inta fadhi ee ay noqon karto ugu yaraan 1 fadhi ugu badnaana wixii macquula laakiin waxaad ku dadaashaa inaadan daahin
16.qiimaynta caddaymaha dhinacyada Dacwadda iyo u adeegsiga kiis kasta cadaynta ku haboon.
17.Amridda tirtiridda hadallada aan haboonayn iyo kuwa xumaanta ee dhinacyadu adeegsadaan Dacwadda dhexdeeda.
18.magacaabista khabiir farsamo,turjumaan iyo caawiyayaal kale
19.kasoo qaygalinta Dacwadda Garyaqaanka Guud marka dowladdu dhinac ka tahay ee lagu doodo in hantidani ay leedahay dowladdu.
20.ka soo qaybgelinta Dacwadda Xeer-ilaaliyaha Guud hadii lagu doodo in dacwaddu been abuur tahay iyadoo la raacayo habracaa oogista dacwadda been abuurka iyo mararka kale ee sharcigu u

ogolyahay
21.ka jawaabidda codsiyada dhinacyada dacwadda dhexdeeda.
22.qabashada dukumentiga Original ah dacwadda been abuurka.
23.u hogaansamidda lixda mabda' ee bangalore Dacwadda dhexdeeda
24.kormeeridda Goobta Dacwaddu ka taagantahay hadii loo baahdo.
25. U diridda hubinta cadaymaha cida uu ka soo baxay dukumentigaasi iyo Maamulka Guud ee Dowladda
26.qiimaynta in Dacwaddu u bislaatay gabagabo iyo in kale
27. Ka noqoshada gabagabada iyo Amridda sii wadida Dacwad la gabagabeeyey .

## 2.3 Shaqada Garsooraha Dacwada Madaniga ka dib

1.Baadhista Dhamaan Waraaqaha Galka ku jira iyo lafaguridda Cadaymaha ku jira galka 78,80 iyo 185XHM
2. Iswaafajinta Go'aanka(xukun ama Qaraar) iyo Dulucda Dacwadda Qod.77 XHM
3.Raacidda Sharciga iyo Cadaaladda Guud marka uu Garsooruhu Go'aan gaarayo Qod.78 XHM
4.Sababaynta Xukunka Qod.92 XHM
5.ka jawaabida Codsiyada dhinacyada oo keliya Qod.77 iyo 194 XHM
6.Qiimaynta kharashaadka Dacwadda iyo Xushmada Qareenka si loo saaro Cida laga Guulaystay Qod.62 XHM
7.Adeegsiga luqada Soomaaliga marka Go'aanka la soo saarayo 83 XHM,dadka Ajaanibta waa loo tarjumayaa Xukunka
8.Hubinta in Go'aanka la ga helo dhamaan Qodobada iyo Shuruudaha ku xusan Qod.92 XHM
9.Faafinta Xukunka iyadoo la dhigayo Kaalinta Maxkamadda,waxaana dhinacyada gaadhsiinaya Kaaliyaha 93 XHM
10.ku faafinta Xukunka warbaahinta Iyo IWM,hadii uu waxtar u leeyahay Hagaajinta ama kabidda Dhibka soo gaadhay dhinaca

Qod.81 XHM

11.Sixidda gafafka maadiga ah ama Xisaabta ee Go'aanka (Xukun ama qaraar,Amar iwm),markuu soo baxo ka dib Qod.201XHM iyo Raacida habraaca Sixitaanka ee ku xusan Qod.202 XHM

12.Hubinta Tirakoobka Kaaliyaha ee dhamaan Waraaqaha ku jira Galka

13. Hubinta u gudbinta Galka Dacwadda Arkiifiyada Maxkamadda

F:G: Tilmaamida Xaqa Rafcaanka ama u cabashada Maxkamadda Sare waa la talin sharci ee Shaqadaada maaha